Maxay tahay sababta aan u helayo Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR)?

- Children Administration (Maamulka Carruurtu) wuxuu helay warbixin tabashooyin kusaabsan ammaanka ilmahaaga.
- Warbixintu waxay buuxisay qeexista sharciga ah ee gabboodfalka iyo dayaca ee gobolka Washington (RCW 26.44.020).
- Warbixintu ma sheegin in ilmahaagu ku sugan yahay khatar dhaw.
- Children Administration (Maamulka Carruurtu) wuxuu rabaa inuu kaala shaqeeyo caawin ilaalinta ammaanka carruurtaada.

Yaan laxiriiraa haddii aan qabbo welwelo kusaabsan kiiskayga?

Haddii aad qabto cabasho ama welwel kusaabsan sida kiiskaada loo maareeyo, wac horjoogaha shaqaalaha kiiskaada FAR.

Haddii aanan weli laxalin welweladaada waxaad wici kartaa Maamulaha Soonaha.

Adiga waxaad kawici kartaa Xafiiska Xiriirada Dastuurka lambarkaan 1-800-723-4831 si ay kuucaawiyaan wakhti kasta.

-ama-

Adiga waxaad kawici kartaa Xafiiska Qoyska iyo Wakiilka Dulmiga Caruurta* lambarkaan 1-800-571-7321.

*Hay'addani way kaduwantahay Qaybta Adeegaha Bulshada iyo Caafimaadka. Waxay baaris kusamaynaysaa welwelada kusaabsan Maamulka Caruurta.

Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR) isticmaalka xarfaha QR ee hoose, ama booqo websaytka Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR):

www.dshs.wa.gov/ca/about/far.asp

Washington State Department of Social & Health Services
DSHS 22-1534 SM (5/14)

Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR)

Jidka CPS ee xoojinta iyo taageerada qoysaska

Waa maxay Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR)?

Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR) waa qaab kale oo ay leedahay Adeegyada Ilaalinta Ilmaha ee Gobolka Washington si ay uga jawaabaan warbixinaha qaar kusaabsan gabboodfalka iyo dayaca ilmaha. Kahor Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR), CPS intayna kaga jawaabin warbixinaha gabboodfalka iyo dayaca ilmaha baadhis.

Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR) waxay la shaqaysaa qoysaska si ay:

- U taageeraan markay dhibaato ku sugan yihiin iyagoon haysan waalid ka masuul noqda gabboodfalka ama dayaca ilmaha.
- Uga caawiyaan la xiriirka beelahooda.

Baadhayaasha iyo shaqaalaha kiiska Jawaabta Qiimaynta Qoysku (FAR):

- Waxay la shaqeeyaan qoysaska si ay u ilaaliyaan ammaanka carruurta.
- Aqoonsadaan baahiyaha qoysaska.
- Waxay ku dhisan yihiin xoojinta iyo khayraadada waalidka iyo beesha.
- Waxay raadiyaan adeegyo si ay u sahlaan xaaladaha dhibta leh oo adkaynaya in shiishka la saaro baahiyaha carruurta.

Baadhisaha:

- Go'aaminta in gabboodfalka ama dayaca ilmuhu dhacday.
- Aqoonsiga cidda ka masuulka gabboodfalka ama dayaca la sheegay.
- Samaynta xaqiiq raadis kusaabsan in gabboodfalka ama dayaca ilmuhu dhacay. Tan waxa lagu hayaa diiwaanada DSHS, waxayna saamayn kartaa ka shaqaalaysiinta mustaqbalka ee carruurta ama dadka nugul.

Siday Jawaabta Qiimaynta Qoyska u shaqaysaa?

Marka Children Administration (Maamulka Carruurtu) helo warbixin kusaabsan qoyskaaga, shaqaalaha kiiska Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR) ayaa kula kumi si ay kaagala hadlaan ammaanka carruurtaada.

Shaqaalaha kiiska ayaa kaala shaqayn go'aansiga haddii aad u baahan tahay adeegyo ama taageero si uu hoos ugu dhigo halista gabboodfalka iyo dayaca ilmaha ee mustaqbalka. Shaqaalaha kiiskiinu wuxuu ka caawin doonaa qoyskaaga inay ka gudbaan dhibaatooyin.

Inta badan kiisaska Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR) waxay ku xidhmi 45 maalmood gudahood. Hase yeeshee, adiga iyo shaqaalaha kiiska Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR) waxaad dooran kartaan inuu kiiskaagu furnaado 90 maalmood, haddii ay wanaagsanaato sii wadista adeegyada lagu taageerayo shaqada fiican ee aad bilawday.

Waxaad leedahay doorashooyin:

- Waxaad dooran kartaa inaad kaqaybgasho Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR)

-ama-

- Waxaad dooran kartaa yeelato baadhista CPS ee soojireenka

Haddii aanad ku raacsanayn adeegaha kiiskaaga Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR) adeegyada iyo baahiyaha qoyskaaga, waxa aad codsan kartaa kulan aad la qaadato shaqaalaha Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR) si aad ugala hadasho ikhtiyaaro kale.

Siday Jawaabta Qiimaynta Qoyska ii caawin kartaa?

Waad garanaysaa waxa adiga iyo qoyskaagu u baahan tihiin.

Shaqaalaha kiiskaaga Jawaabta Qiimaynta Qoyska (FAR) wuu kula shaqayn si aad:

- U aqoonsato sida aad u horumarin karto ammaanka ilmahaaga ee guriga.
- U buuxiso baahiyaha aasaasiga ah ee qoyskaaga.
- U kordhiso xirfadaha kaa caawinaya barbaarinta carruurtaada da' kasta iyo marxalad kasta.
- U samayso xidhiidh ka xoog badan sidii hore oo aad la yeelato beeshaada.
- U hesho khayraadada iyo la-taliyayaasha beesha si aad u xalliso tabashooyinka jira sida guryiynta, shaqada, ama arrimaha kale ee dhibaatada ku abuuraya adiga iyo qoyskaaga.

Si wadajir ah waxaynu ka wada shaqayn karnaa dhisidda kalsoonidaada iyo xirfadahaaga si aad u ilaaliso ammaanka carruurtaada.

Shaqaalaha kiiskaagu wuxuu ka caawin doonaa qoyskaagu inay ka gudbaan dhibaatooyinka.